

WIXI KU SAABSAN CAAWIN IYO MACLUUMAAD

MACLUUMAADKA SOCODKA KAXEYAHAA

King County Metro Transit

Rider information (206) 553-3000
www.kingcounty.gov/metro
Twitter @kcmetrobus

Community Transit

(425) 353-7433 (RIDE)
www.communitytransit.org
Twitter @MyCommTrans

Pierce Transit

(253) 581-8000
www.piercetransit.org
Twitter @PierceTransit

Sound Transit

1 (888) 889-6368
www.soundtransit.org
Twitter @SoundTransit

Amtrak

1 (800) 872-7245
www.amtrak.com

DUGSIYADA

Dhageyso raadiyaha iyo telefishanka deegaanka si aad u heshid macluumaad ku saabsan xeritaanka dugsiga iyo isbaddalada jadwalka. Fadlan hubso in aad haysatid macluumaadka dugsiga deegaanka qeybiyo ee ku saabsan barafka soo dhaca iyo barafka adag.

Seattle Public Schools

www.seattleschools.org
Twitter @seapubschools

LUQADO KALE

Luuqdaha aan ka ahayn Ingriisiga

www.seattle.gov/transportation/winterweather.htm

DAYACTIRKA WADDOOYINKA

Seattle Department of Transportation

(206) 684-7623 (ROAD)
www.seattle.gov/transportation
Twitter @seattledot

King County Road Services Division

Dayactirka Jidka (206) 296-8100
www.kingcounty.gov/transportation/kcdot/roads

Magaalooyinka yaryar

La hadal Waaxda Hawlaha Guud ama Waddooyinka eek u taalla magaaladaada.

KORONTO LA'AAN

Seattle City Light

(206) 684-3000
www.seattle.gov/light
Twitter @SEACityLight

Puget Sound Energy

1 (888) 225-5773
www.pse.com
Twitter @PSETalk

XAALADAHAA JIDADKA WAAWEYN IYO DOOMANKA

Washington State Department of Transportation

Xaaladaha Jidka wac 511
www.wsdot.wa.gov/traffic
Twitter @wsdot_traffic

Washington State Ferry Information

Gobolada oo dhan la hadal 511
Seattle dhexdeeda waxa laga dhigay atomatik (206) 464-6400
www.wsdot.wa.gov/ferries
Twitter @wsferries

2019-2020



Seattle
Department of
Transportation

HAWADA JIILAALKA



SOMALI

BARAFKA QABOBAHA - WAA KAN QORSHAHENA

Magaalada Seattle, qaboobaha wuxuu keeni karaa roob culus, dabayl badan, barafka fadhiista iyo barafka soo dhaca. Waxaan nahay diyaar.

- Shaqaalaha wuxuu la socdaa cimilada 24 saac maalin kasta, sannadka oo idil, wuxuuna si toos ah ugu xeran yahay khadka Adeegga Cimilada Qaranka (National Weather Service) iyo wararka laga helo radaarka Doppler.
- Waxaan isticmaalnaa qalabka saadaalinta lala soo saaray Jaamacadda Washington, kaasoo lagu magacaabo SNOWWATCH (LA SOCOSHADA BARFKA) si aan u barano sida barafka inta badan u saameeyo xaafadaha kala duwan. Macluumaadka wuxuu kaalmo ka geystaa go'aaminta meesha shaqaalaha looga baahnaa doono marka hore.
- Waxaa jira qalab ku shaqeeyo kombuyutar oo lagu meeleeeyo buundooyinka, iyo qalab kale oo la dhigo dhulka, kuwasoo si sax ah waqti kasta u sheega heerkulka hawada iyo jidka.
- Waxaan isticmaalnaa kaameerooyin isla markiiba soo gudbiya xaaladaha dhabta ah ee ka jira jidadka muhiimka ah. Waxyaabaha ay soo gudbiyaan kaameerooyinka waxaad ka arki kartaa bogga internetka SDOT, www.seattle.gov/travelers.

Magaalada Seattle waxay qaaddaa talaabo firfircoon, iyadoo isticmaasha dhaqamada ugu fiican si ay uga hortagto barafka soo dhaca iyo kan fadhiista:

- Shaqaalaha SDOT waxay isticmaalaan baabuurta waaweyn kuwasoo lagu xero qalabka xaaqa barafka iyo qalabka ku shuba cusbada si ay u furaan jidadka waaweyn.
- Ka hor inta barafka uusan soo dhicin, shaqaalaha waxay horay uga shaqeyaan jidadka muhiimka ah iyo buundooyinka iyagoo ku daadiya waxyaabo ka dhalaaliya barafka si looga hortaggo in uusan fadhiisanin.
- Marka barafka biloowdo in uu soo dhaco, shaqaalaha waxay bilaabaan in ay gawaari ku wadaan jidadka, iyagoo cusbo ku shuba meelaha looga baahan yahay. Qiyaas ahaan, marka barafka gaaro hal inji, waxay bilabaan in ay xaaqaan.
- Marka barafka soo dhaco, habka Global Positioning Satellite (GPS) (Meeleynta Guud ee Satellitika) ayaa la socda meesha ay ku sugan yahiin gawaarida. Khariidada ku taal bogga internetka SDOT ayaa muujisa meesha ay baabuurta ku sugan yahiin waqtigaas iyo jidadka ay gawaarida ka shaqeyeen. Marka baraf jiro, waxaad ka arki kartaa khariidada ku taal bogga internetka web6.seattle.gov/sdot/winterweathermap

MARKA BARAFKA SOO AADO XAGGENA - WAAN IS DIYAARINAA

Waxaan xaaqi doonaa jidadka waaweyn. Waa waddooyinka muhiimka ah ee loogu talagalay baabuurta degdegga, gaadiidka dadweynaha iyo inta badan baabuurta jidadka. Waa jidadka ugu muhiimsan ee lagu tago hay'adaha dadweynaha ee waaweyn sida isbitaalada iyo dugsiyada, Jidadka ay badanaa isticmalaan booliiska, baabuurta dabka iyo basaska, iyo jidadka lagu tago loo-shaqeeyayaasha waaweyn ee Seattle. Ma xaaqno jidadka aan halbowlaha ahayn.

- Waxaan bilownaa in aan isu diyaarino qaboobaha inta lagu jiro xilliga kuleylaha: tababarka shaqaalaha, toosinta qalabka iyo la shaqeynta iskaashatada wakaaladda deegaanka.
- Marka la saadaaliyo dabayl badan ama roobab culus, shaqaalaha waxay diyaar u yahiin in ay jidka ka qaadaan geedaha dhacay, iyo in ay hagaajiyaan calaamadaha iyo tilmaameyaasha.
- Saadkena cusbada iyo dareeraha loo isticmaalo dhalaalinta barafka waxay diyaar u yahiin in ay ka hortagaan in barafka uusan fadhiisanin jidadka magaalada iyo buundooyinka.

BOGAGGA INTERNETKA SDOT EE LAGA HELO MACLUUMAADKA WAXTARKA LEH

www.seattle.gov/transportation/winterweather.htm
<https://takewinterbystorm.org/>
www.seattle.gov/travelers
Twitter @SDOTtraffic
sdotblog.seattle.gov
www.seattletraffic.org

KA-QAADISTA WADOOYINKA AY DADKU MARAAN EE JIDKA DHINAC MARA BARAFKA IYO BARAFKA DHAGAXOUBEY

Maadaama Soonaha Puget Sound Convergence uu abuurayo cimilo aan la saadaalin karin, waxaan ku kasoonaahay dadka deggan in ay nadiifin doonaan meesha ay wadada sharci ahaan xaqa u leeyihiin in ay maraan ee u dhow. Xaqiiqdii, Tittle 15 ee Xeerka Dowladda Hoose ee Seattle ayaa wuxuu ugu baaqayaa milkiilayaasha guryaha iyo qandaraaslaha ayaa in ay nadiifiyaan, ka qaadaan wixii yaalla, ama in ay dayactiraan wadada sharci ahaan xaqa u leeyihiin in ay maraan ee u dhow.

Sida ku xusan Tittle 15, waa mas'uuliyadda milkiilaha guriga ama cidda deggan (sida qandaraaslaha) in uu waqti ku habboon daryeelo wadooyinka ay dadku maraan ee jidka dhinac mara iyo waxyaabaha kale ee wadada sharci ahaan ay xaqa u leeyihiin in ay maraan ee xigta guriga gaarka loo leeyahay. Nadiifinta barafka ka hor inta uusan isku beddelin baraf dhagaxoobey ayaa ugu wanaagsan, iyo haysashada badeel iyo in aad heli karto kiish cusbada wadada ah ayaa ah tallaabada wanaagsan ee u-diyaar-garowga-xilliga-qaboobaha.

ISKU-CIRIIRINTA SEATTLE – SAAMEYNTA SOCDAALKA

Bilaha ka-dib xilliga qaboobaha, sida dadka safarka ah ay u safraan ayaa isbeddel weyn ku imaan doona sannadka oo dhan. Magaallada Seattle waxaa ay mareysaa waqti adag oo ay jiraan gaadiid badan. Shanta sano ee soo socda, bartamaha magaalada Seattle waxaa ay ku jiri doontaa xaalad kala-guur ah si loo haqabtiro baahiyada magaaladeenna sii koraysa. Injineerada gaadiidka ayaa waxaa ay ku magacaabeen marxaladdan kala-guurka ah Isku-ciriirinta Seattle. Inta lagu guda jiro muddadan, dadka ku dhex socda gudaha iyo hareeraha bartamaha magaalada waxaa saameyn doona dhismaha kordhay, taas oo keeni doonta ciriiri badan oo sabab u ah waddooyin dheeraad ah oo la xirayo iyo dib-udhac joogto ah.

Waa maxay shan tallaabo oo fudud ee aad qaadi karto si aad wax uga beddesho habka aad u socdaasho?

1. Hore ugu qorsheyso oona filo taraafiko baddan oo ah waddooyinka bartamaha magaalada ah.
2. Sii nafsadaada wakhti dheeraad ah si aad u gaartid meesha aad u socotid.
3. Isku day qaab cusub oo gaadiid raacid ah sida in aad lugaysid, baaskiil waddid, ama bas raacdid ama tareenka fudud. Ka fogaaw in aad gaari wadato keligaaga haddii ay suurtagal tahay.
4. Booqo www.seattle.gov/traffic si aad u heshid qalabka iyo macluumaadka aad u baahantahay si aad u tagtid agagaarka inta lagu guda jiro #SeattleSqueeze.
5. Noqo qof u naxariista oona samir u leh dadka adiga kula safraya. Dhammaanteenu midaan waynu u wada taaganahay!

Si wadajir ah, ayay Dowladda Hoose ee Magaallada Seattle iyo WSDOT ugu wada shaqeynayaan in sida ugu macquulsan loo yareeyo saameynta inta lagu guda jiro muddadan uu jiro ciriiriga gaadiidka.

TALOYINKA DEGDEGGA CIMILADA QABOобаHA

U LABBISO QABOобаHA



KAALMEEY DERISKA:

- Baneey dhinacyada lagu socdo
- Raashinka, saadka



SDOT WAXAY BARAFKA ADAG IYO BARAFKA 500 DHACA KA QAADAA JIDADKA WAAWEYN



KA QAAD DHINACYADA LAGU SOCCDO, CALEENTA, BARAFKA 500 DHACA, IYO BARAFKA ADAG



OGOW JADWALKA BASKA JIDKA BARAFKA QAADO BASKA



DHAGEYSO SAADAALINTA CIMILADA



U HOGGAANSAN CALAAMADAHA "JIDKA XERAN"



BAABUURKA:

- Wad baabuurka haddii ay tahay lagama maarmaan oo keliya
- Nadiifi dariishadaha
- Gasho lugo wanaagsan; diyaarso galabka dhulka qabsada
- Si tartiib ah u wad
- U dhaafo masaafo badan inta u dhaxeeyso baabuurta



WAXA KHARIIDADA MUUJISO

Jidadka barafka SDOT waxay muujiyaan heerka adeegga loo qorsheyay jid kasta, ee ma aha jidadka horta la xaaqi doono. Waxaan heerka ugu sareeyo adeegga siin doonaa jidadka ugu muhiimsan ee ku yaala gudaha Magaalada Seattle kuwaasoo ay Magaalada dayactirto. (Gobolka wuxuu dayactiraa I-5 iyo dhowr buundo oo ku yaala Seattle.) Jidadkaan waxaa loo doortay maxaa yeelay waa jidadka ugu baabuur badan ee isku xera xaafadaha Seattle iyo magaalada hoose iyo inta badan gobolka Puget Sound. Marka barafka ku balaarto magaalada oo idil, istraatjiyada SDOT waa in isla markiiba wax laga qabto jidadka labada heer adeegga si baabuurta u socdaan.

Xasuuuso, SDOT ma xaaqdo jidadka aan ahayn jidadka halbowlaha.

HEERARKA ADEEGGA

Hariidada waxay muujisaa jidadka barafka ee kala duwan, waxayna ku muujisaa labo midab kala duwan, dahabi iyo cagaar iftiima.

Jidadka Barafka Dahabiga: Waa jidadka muhiimadda ku leh gobolka ee lagu tago isbitaalada, basaska, baabuurta waaweyn iyo loo-shaqeeyeyaasha waaweyn. Ujeedada SDOT waa in ay baneeyso kana dhigto qoyaan dhamaan leen kasta oo lagu safro muddo 12 saac gudaheeda laga bilaabo marka barafka si wanaagsan u joogsado.

Jidadka Barafka Cagaarka Iftiima: Waa jidadka muhiimadda u leh magaalada sida isbitaalada, basaska, iyo baabuurta guud. Ujeedada SDOT waa in la baneeyo lagana dhigo qoyaan hal leen jiha kasta muddo 12 saac gudaheeda laga bilaabo marka barafka si wanaagsan u joogsado.

ISKUDUWIDDA LALA SAMEEYO SIISTEMKA BASKA

SDOT iyo Gaadiidka Magaalada Dagmada King waxay u shaqeyeen si taxadir leh si loo hubsado in jidadka barafka SDOT la kulmaan baahida dadweynaha raaca gaadiidka. Jidadka barafka waxaa ka mid ah jidadka ay basaska Metro adeegsadaan marka barafka soo dhaco.

JIDADKA KALE

Waxaa jira jidad ay kooxaha SDOT aysan awoodin in ay xaaqaan ama ku shubaan cusbo. Waa jidadka baabuurta ku yar tahay, iyo jidadka ku yaal dhinaca buurta oo badanaa ammaankooda yar yahay xagga dadweynaha iyo baabuurta SDOT waqtiyada barafka xargago iyo marka barafka soo dhaca.

Kooxahena waxay ogsoon yahiin in badanaa ammaanka taagyada aad u liidato marka baabuur lagu wado waqtiyada barafka dhaco. Kooxaha waxay geesaha jidkaan dhigaan calaamadaha Jidka Waa Xeran Yahay (Street Closed), horaanta qaboobaha, si loo helo marka loo baahdo loona xero jidadka. Marka Sarakiisha Boliiska Seattle (Seattle Police Officers) go'aan ku gaaraan in ammaanka jidka liito marka baabuur lagu wado, waxay bartamaha jidka dhigaan calaamadaha Jidka Waa Xeran Yahay (Street Closed).

Si loo dhowro ammaankaada, waxaa muhiim ah in loo hoggaansamo calaamadaha Jidka Waa Xeran Yahay (Street Closed) xataa haddii jidka uu kuugu muuqdo in uu ammaan yahay. Waxaa dhici karto in baraf xargagay uu hoosta ka fadhiyo barafka soo dhaca, ama waxaa dhici karto in ay jirto meel dhibaato leh oo aadan arki karin.

HEERKA ADEEGGA BARAFKA SOO DHACA/BARAFKA XARGAGAY

GOLD


Dhamaan jidadka lagu safro waa furan yahiin iyo waa qoyan yahiin muddo 12 saac gudahooda laga bilaabo marka roob yaraado

EMERALD

Jiha kasta waxaa furan hal leen oo qoyan muddo 12 saac gudahooda laga bilaabo marka roobka yaraado



DOWNTOWN



Elliott Bay

Lake Washington

S JACKSON ST
S DEARBORN ST

